Taariikh 24/11/2018

Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BFS
Ku: Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda Federaalka Somalia
Ku: Madaxweyneyaasha Dowladaha Xubanaha ka ah Dowladda Federaalka
Og: Guddoomiyaha Guddiga Wasiirada Dowladda Federaalka
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Somalia

**Ujeedo: Warbixinta iyo Go'aanka Guddiga Gaarka ah ee Aqalka Sare**

Tixraac warqadda Guddomiyaha Aqalka Sare, 04/11/2018, ee lagu magacaabay Guddiga Gaarka ah ee lix da Senator iyo warqadda Ra'iisul Wasaaraha XFS, 22/10/2018, uu ku magacaabay Guddiga Wasiirada ah; kuwaas oo 18/11/2018 kulan kula yeeshay, Xarunta Aqalka Sare, Guddiga Gaarka ah ee Aqalka Sare, dabadeed na soo qoray warqadda lambar WAGF&D/XW/070/18 ee 19/11/2018. Haddaba, waxaan halkaan ku soo gudbineynaa, warbixin ahaan, **Go'aanka Guddiga Aqalka Sare uu ka gaaray xal-u-helidda khilaafaadka u dhexeeya Xukuumada DFS iyo DXDF**.

Markii uu wejiga 1aad ee xal-u-raadinta khilaafaadka u dhexeeya DXDF iyo Xukuumadda Federaalka Soomaaliya (XFS) uu ku soo dhamaaday warbixintii wufuuddii Aqalka Sare ka soo qoreen DXDF kuna soo ururiyeen tabashooyinkii DXDF, dabadeedna, uu Guddiga Gaar ah ee Aqalka Sare u gudbiyay liiska tabashooyinkas Guddi afar Wasiir ah ee ka socday Golaha Wasiirrada oo shir lala yeeshay, 5/10/2018, si ay u soo darsaan ugana soo jawaabaan, si tifaftiran, wixii ay garowsho ka bixinayaan iyo wixii kale.

Intaas ka dib, Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada FS wuxuu soo magacabay, 22/10/2018, Guddi Wasiirada ah waxaa na la soo siiyay awood in…"ay Aqalka Sare iska kaashan doonaan si ay xal ugu heli lahaayeen cabashooyinka Aqalka Sare ay soo gaarsiiyeen Dowlad Goboledyada Xubnaha ka ah Dowlada Feederalka qaarkood".

Markii Aqalka Sare uu helay magacaabidda Guddiga Golaha Wasiirada wuxuu qoraal u diray DXDF, si ay iyagu na dhinacooda u soo magacaabaan Guddi Wasiira ah oo hor fariista Guddiga Golaha Wasiirarada Dowladda Dheexe, haasayeeshe taasi ma dhicin.

Taas bedelkeeda, waxaa warqad soo qoray Madaxweynaha Puntland Cabdiweli Cali Gaas, 29/10/2018, oo markaas ahaa Guddomiyaha GIDG, wuxuuna ka cudurdaariyay imaatinka GIDG ee Muqdisho, isaga oo

tixraacaya War-murtiyeed ay GIDG soo sareen,14/09/2018, oo shuruudo lahaa - sida goobta shirka, amniga, ajeendaha iwm – kagana jawaabayeen codsigii Madaxweynaha JFS, Maxamed Cabdullahi Farmaajo uu ugu yeeray GIDG in ay shir wadatashi ku yeeshaan Muqdisho 17-18 Sebtember 2018. Haseyeshee, Cabdiwali wuxuu qoraalkiisa ku soo dhameeyay in … "Aqalka Sare in uu wadahadal kala yeesho dowlada dhexee arimahaas, kadib na wax go'an ah ee xal u noqan kara khilaafkan uu soo jeediyo, taas oo Golaha Iskashika Dowlad Goboledyadu dhinaciisa aqbali doono"

Intaa kadib, Aqalka Sare ee BFS wuxuu qaatay go'an uu ku magacaabay Guddi Gaar ah "Guddiga wada-xaajoodka xal-u-helida khilaafka u dhexeeya Xukuumadda DFS iyo DXDF". Guddigaan Gaarka ah wuxuu shir la qaatay Guddiga Wasirada ah ee uu soo magacaabay Ra'iisul Wasaaraha Xukumadda Federaalka Somalia, wuxuu na hordhigay Wasiirada,18/11/2018, qoral uu ku urursanyahay nurxurka dhammaan tabashooyinka Maamuladu ay ka tirsanayeen Xukumadda DFS ee loo baahan yahay in la isla qaato, lana xaliyo. Qoraal kaas Wasiirada waa loo akhriyay, nuqul na waalaga siiyay, waxay shirkii ka qireen inuu yahay qoraal wanaagsan, ay na ku qanceen, hase- yeeshee ay ka soo barandegayaan.

Ugu dambeyntii, Guddii Wasiirada waxay Guddiga Gaarka ah ee Aqalka Sare u soo qoreen warqadda lambar WAGF&D/XW/070/18, ee 19/11/2018, nurxurkeedo ahaa mahad-naq iyo bogaadiid dadaalka lagu raadinayo xal- helidda khilaafka jira…"waxaan idinkaga mahad celineyna dadaalka aad geliseen sidii xal loogu heli lahaa tabashooyinkaas"… waxaan "idinka mahadcelineyna wadahadaladii hufnaa ee aad nala yeelateen… "waxaan idinka codsaneynaa in aad noo soo gudbisaan talo soo jeedintina ku aadan wadahadalkii aad la yeelateen laba dhinac".

Haddaba, shir uu yeeshay, 24/11/2018, Guddiga Gaar ah ee Aqalka Sare ee xal-u-helidda khilafka labada dhinac, wuxuu qoralkan ku soo gudbinaya, **go'aan ahaan tabashooyinka loo baahan yahay in Xukumadda Federaalka ah ay sida ugu dhaqsa badan uga hawlgasho, una fuliso wax ka qabashadiisa, si loo soo celiyo wadashaqeyntii Heyadihii Dawliga ah - Heer maamul Dhexe iyo Maamul Goboleed, Aqalka Sare-na waxaa waajib ka saaran yahay xaqiijinta dhammeytirka xal u helidda khilaafka.**

Cabashooyinkii ay soo gudbiyeen Maamulada Xubnaha ka ah Dowlad Federalka waxaay u qeybsan yihiin, cabashooyin Guud oo aay ka simanyihiin Maamuladu iyo kuwa gaar gaar ah.

**Cabashooyinka Guud ee ay ka simanyihin Maamuladu waa**:

1. Dedejinta dhameystirka Dasturka Federalka (Xeerka Qaranka)
2. Ka howlgelidda dhismaha Ciidanka Qaranka iyo suggidda Amniga

3. Dhisidda Guddiga Garsoorka Qaranka iyo Dib-u-habeynta Garsorka
4. Ka howlgelidda dib-u-heshiisiinta iyo midnimada Qaranka.
5. Ka heshiinta qaabka dooroshada guud 2021 iyo dhismaha axsaabta.
6. Xojinta nidaamka federaaleynta, siyaasad ahaan iyo dhaqaale ahaan.
7. Mideynta Qorshaha Qaranka, sida wax-qeybsiga mashariicda iyo dhaqalaha, iyada oo Dowlada dhexe ay yelaneyso go'aaminta meelaha ku habboon, ka hirgelinta kabeyaasha dhaqalaha iyo bulsho ee heer qaran.
8. Faragelin la'anta dorooshoyinka DXDF iyo kuwa Dowladda Dhexe;

**Cabashooyinka u kala Gaarka ah ee Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federalka:**

**Puntland:** Taageridda Ciidanka Xooga Dalka (SNA), qeybta Puntland, xaga mushaaroyinka, tababarada iyo agabka.

**Jubbaland :** Taagerida Ciidamada daraawishta ee Jubbaland tayeyntooda iyo kala howlgelidda sugidda amniga guud ee Jubbaland.

**Konfur Galbeed:** Kala shaqeynta sugidda amniga Konfur Galbeed gaar ahaan wadada halbowlaha ah ee isku xirta Muqdisho iyo Baydhabo.

**Galmudug :** La dhisida Ciidanka Maamulka Galmudug iyo la xoreynta degaamada ay amni-darrada ku hayaan Al-shabaab.

**<u>Gunaanadka go'aanka</u>**

Guddiga Gaar ka ah ee Aqalka Sare BF waxa ay Xukuumadda Federaalka u soo jeedinayaan in ay si dhaqso ah uga hawlgasho fulinta qodobada go'ankan kor ku xusan, ee ka kooban 8 qodob oo guud iyo 4 midba gooni u yahay maamul, oo ah nuxrurka tabashooyinkii laga soo ururiyay DXDF.

Go'ankan waxaa lagu saleeyay tabashooyin u dhexeeya Hey'ado isku Dawlad ah oo leh "Shakhsiyad Sharci" (Legal Entities), si waafaqsan Dastuurka KMG ee Somalia, kaas oo ku soco- la'aantiisu ay waxyeela u geysaneyso qabashadii adeegyadii ay dadka iyo dalka u hayeen Hay'daha Dawliga ah ee Maamulka Dhexe(DFS) iyo kuwa Degaamada (DXDF); tusaale ahaan, eeg lifaaqan qodobada Dastuurka KMG ee Federalka Somalia: **<u>Qodobka 50aad - Mabaadi'da Federaalka ee Jamhuriyadda Federalka Somalia; Qodobka 51aad - Xiriirka Iskashiga Heerarka Dawladda Jamhuriyadda Federalka Somalia; Qodobka 52aad - Iskashiga Xukuumadaha xubinta ka ah Dawladda Federalka.</u>**

Ugu dambeyntii, Guddiga Gaar ka ah ee Aqalka Sare wuxuu go'aankiisa ku saleyay Dastuuriyan in **Heerka Dowladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka ay masuuliyadooda tahay, inta badan, fulinta adeegyada ay dadku uga baahan yihiin Gobolada iyo Degmoyinka dalka ee ka baxsan Caasimadda Mogadisho.** Sidoo kale na **ay masuuliyadda Dawladda Dhexe ee Federalka tahay, 'u-taagnaanta iyo matalaadda Qaranimada Somalia** (the sovereignty of the Somalia Nation State), tusaale ahaan, eeg lifaaqa: **qodobka 87aad – Madaxweynaha Jamhuriyadda Federalka ee Somalia waa: (1) … (b) Astaanta midnimada Qaranka, (c) Ilaaliyaha iyo horumariyaha mabaadi'da asaasiga ah ee Dastuurka**. Sida ku cad: **qoodobka 3aad ee Dastuurka Federaalka Somalia.** Tusaale ahaan Eeg: **qodobka 99aad Xilalka Golaha Wasiirada (a) Dejinta siyaasadda guud ee Xukuumadda iyo dhaqangelinteeda…**

WABILLAAHI TAWFIIQ

| | **Guddiga Gaarka ah ee Senatarada Aqalka Sare** | **Saxiix** |
|---|---|---|
| 1. | Cabdiraxmaan Maxamed Maxamud Farole (Guddomiye) | |
| 2. | Cabdulaahi Sheikh Ismaacil Farta Xubin | |
| 3. | Sacida Xasan Cusmaan " | |
| 4. | Cabdulaahi Cabdi Garun " | |
| 5. | Cabdi Axmad Dhuxulow (Dhagdheer) " | |
| 6. | Muxiyadiin Sheikh Cali Jaamac " | |

## Qodobka 50aad. Mabaadi'da Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

(1) Heerarka kale duwan ee Xukuumaduhu marka ay dhexdooda ka macaamilayaan iyo marka ay ku gudo-jiraan adeegsiga awoodda sharci-dejinta iyo awoodaha kaleba, waa in ay ilaaliyaan mabaadi'da Federaalnimada; kuwaas oo ah:

(a) Heer kasta oo xukuumadeed waa in ay haysato kalsoonida iyo taageerada dadweynaha;

(b) Awood walba waa in la siiyo hadba heer xukuumadeedka sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta;

(c) Jiritaanka iyo joogtaynta xiriirro iskaashi iyo istaageerid labo-dhinacle ah oo ka dhexeeya Dawladaha xubnaha ka ah federaalka dhexdooda iyo dawladaha xubnaha ah iyo Xukuumadda Federaalka ah;

(d) Si uu u jiro dareen midnimo qaran, degaan kasta oo ka mid ah Jamhuuriyaddu Federaalka ah ee Soomaaliya waa inuu helaa adeegyo iyo waxqabad xukuumadeed oo isku mid ah;

(e) Khayraadka dalka oo si caddaalad ah loo qaybsado;

(f) Dakhli-ururinta oo loo xilsaaro hadba heer xukuumadeedka sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta;

(g) Khilaafaadka oo wadahadal iyo dib-u-heshiin lagu xalliyo.

## Qodobka 51aad. Xiriirka Iskaashiga Heerarka Dawladaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

(1) Heer kasta oo Xukuumadeed ha ahaadeen heerar siman ama kuwo kala sarreeya waa in ay yeeshaan xiriir iskaashi oo wanaagsan

(2) Xukuumad kasta waa in ay ixtiraamtaa, ilaalisaana xadka awoodaha ay leedahay iyo awoodaha ay leeyihiin Dawladaha kale, waana in ay:

(a) La yeelataa xiriir walaaltinnimo oo wax-ku-ool ah heerarka kale ee Xukuumadaha, una horseedaa midnimada muwaaddiniinta;

(b) Heer kasta oo Xukuumadaha waa in ay ku wargelisaa heerarka kale siyaasadaha iyo hawlgallada ay ka fulineyso degaannadeeda oo saamayn ku yeelan kara degaannada heerarka kale;

(c) Yeeshaan siyaasado u adeegaya qorshaynta iyo hirgelinta mashaariic hormarineed oo wadajir ah.

(3) Si loo xaqiijiyo jiritaanka iyo horumarinta xiriirada iskaashiga Federaaliga ah waa in la joogteeyo kulan sanadeed ay wada yeeshaan madaxda fulinta Xukuumadda Federaalka iyo Madaxda Fulinta Dawladaha xubinta ka ah Xukuumadda Federaalka si ay isula meeldhigaan:

(a) Adkaynta Midnimada Qaranka;

(b) Sugidda ammaanka iyo Nabadgelyada Dalka;

(c) Horumarinta dhaqan-dhaqaalaha qaranka iyo suuqa mideysan ee dalka;

(d) Horuumarinta baraaraha shacabka;

(e) Isdhaafsiga macluumaadka.

(4) Dhammaan heerarka Xukuumadda waxaa waajib ku ah inay u hoggaansanaadaan Dastuurka dalka, ayada oo aan heerna isa siinayn awood ka baxsan kuwa Dastuurku siiyey.

(5) Sharci Baarlamaank Federaalku ansxiyay waa inuu xeeriyo:

(a) Samaynta hay'ado iyo habraacyo fududaynaya wada falgelidda heerarka Xukuumadda;

(b) Samaynta hay'ado habaraacyo fududaynaya xallinta khilaafaadka ka dhex dhasha heerarka Xukuumadda inta aanay u gudbin maxkamad.

## Qodobka 52aad. Iskaashiga Xukuumadaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka

(1) Xukuumadda Federaalka ah iyo Xukuumadah xubnaha ka ah waxaa waajib ku ah in madaxweyneyaasha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Mas'uuliyiintooda sare yeeshaan kulammo joogto ama kaltan ay kaga wada xaajoodaan arrimaha degaammadooda wada saameeya oo ay ka mid yihiin:

(a) Ilaha biyaha;

(b) Beeraha;

(c) Xannaanada xoolaha;

(d) Daaqa iyo seeraynta;

(e) La dagaallanka nabaadguurka iyo ilaalinta deegaanka;

(f) Caafimaadka;

(g) Tacliinta;

(h) Xiriirinta iyo wada-xaajoodka hoggamiyeyaal-dhaqameedka, ilaalinta iyo horumarinta xeer-dhaqameedka;

(i) Xiriirinta culimada diinta; iyo

(j) Dhallinyarada.

(2) Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkayadu dhexdooda ama Xukuumadda Federaalka waxay isla geli karaan heshiisyo iskaashi oo ay ku wada hawlgalaan, aanse lahayn awood sharci, kana horimanayn Dastuurka Federaalka iyo kan Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka.

## Qodobka 87aad. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya

(1) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa:

(a) Madaxa Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya;

(b) Astaanta midnimada qaranka;

(c) Ilaaliyaha iyo horumariyaha mabaadi'da asaasiga ah ee Dastuurka.

(2) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka wuxuu xilkiisa u gudanayaa si waafaqsan Dastuurkan iyo sharciyada kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya .

## Qodobka 3aad. Mabaadi'da Asaasiga

(1) Dastuurka Soomaaliya waxaa saldhig u ah Qur'aanka kariimka ah iyo Sunnada Nabigeenna Muxammed (NNKH), wuxuuna ilaalinayaa maqaasidda (ujeeddooyinka) shareecada iyo caddaaladda bulshada.

(2) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal Islaam ah, kana mid ah ummadaha Carabta iyo Afrikaanka.

(3) Mabaadi'da asaasiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisan yihiin mabaadi'da asaasiga ah ee awood qaybsiga Nidaamka Federaalka.

(4) Dastuurka Soomaaliya wuxuu dhiirri-gelinayaa xuquuqda Aadanaha, talinta sharciga, shuruudaha guud ee xeerarka caalamiga ah, caddaaladda, xukuumad loo dhan yahay oo ku dhisan wadatashi, kala-soocidda awoodaha sharci dejinta, fulinta iyo garsoor madaxbanaan, iyagoo leh hannaan ku dhisan isla-xisaabtan iyo hufnaan ka jawaabaya danaha dadweynaha.

(5) Haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhammaan hay'adaha guud ee qaranka, si wax-ku-ool ah, gaar ahaan jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo ee saddexda laamood ee Dawladda iyo

## Qodobka 99aad. Xilalka Golaha Wasiirrada

Golaha Wasiirradu waxa uu leeyahay awoodaha soo socda:

(a) Dejinta siyaasadda guud ee Xukuumadda iyo dhaqangelinteeda;

(b) Ogolaanshaha iyo fulinta xeerarka maamulka, si waafaqsan shuruucda;

(c) Diyaarinta hindiso sharciyadeed iyo soo-hor-dhigiddooda Golaha Shacabka;

(d) Diyaarinta miisaaniyad-sannadeedka iyo xisaab-xirkooda;

(e) Dejinta qorshaha guud oo lagu hormarinaayo dalka;

(f) Dhaqangelinta shuruucda, sugidda nabadgelyada dalka iyo ilaalinta danaha Dawladda;

(g) Magacaabidda iyo xil-ka-qaadidda saraakiisha sare ee Dawladda;

(h) Golaha Wasiirradda waxay soo jeedinayaan magacaabidda/ xil kaqaadidda danjirayaasha, qunsiliyadda guud iyo diblomaasiyiinta.

(i) Awoodaha kale ee Dastuurka ama shuruucda lagu siiyey.